**Xeerka lamba. 22 rep.**

**Xeerarka sharciyeynta ee fulinta xeer no. 5 ee Febraayo 24, 1953 ee dejinta adeegyada diiwaangelinta madaniga ee dadweynaha.**

## MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SIOOMAALIYA

## MAAMULAHA

Marka uu arkay Amarka 5 ee 24 Feberaayo 1953 kaaso lagu dhisay Adeegyada diiwaangelinta dadka ee Dawladda Hoose iyo xaaladaha madaniga ee Dalka; Markaa uu garowsaday baahida loo qabo in la soo saro nidaam lagu hirgelinayo qodobada 1 iyo 10 ee Amarka la soo sheegay.

## WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

### Qod. 1

Madaxda Dawladaha Hoose iyo Maamulka Adeegyada Dawladaha Hoose ee loo diyaariyay abuuridda adeegyada diiwaangelinta dadka iyo xaaladaha madaniga waxay ku tallaabsanaaan samaynta iyo si joogta ah in ay u hayaan kaararka iyo diiwaanada hoos ku qoran, si waafaqsan shaxanka ku lifaaqan Dekereetadaan:

— Kaaraka dadka (Modd. A, B, C iyo D);
— Diiwaanka socdaalka (E);
— Diiwaanka qaxootiga (Mod. F);
— Diiwaanka dhalashada ( Mod. G);
— Diiwaanka guurka (Mod. H);
— Diiwaanka furiinka (Mod. I);
— Diiwaanka dhimashada (Mod. L).

### Qod. 2

Kaararka dadka waxay ka koobanyihiin:

a) — waraaqaha qoyska (Mod. A);
b) — waraaqaha unugga qoysnimida;
c) — kaaraka shaqsiyaadka, ee labka (Mod. C iyo kan dheddiga (Mod. D).

Shaxan kasta ee ka mida kuwa kor lagu soo sheegay midabkiisu kan kale waa ka duwanyahay.

### Qod. 3

Warqadda qoyska waa in lagu asteeyaa madaxa qoyska, waana in lagu qoraa isaga ka dib, ugu horreyn xaaska iyo wixii caruura ka dibna dadka idil ee kula nool deegaankiisa daraja kasta ha lahadeen.

Madaxa qoyska xitaa wuxuu noqon karaa hal qof oo keligiis meel deggan, sida naag la furay, ama laga geeriyooday, ama say deggan deegaan kale ee dawlad hoose, oo keligiis caruurtiisa ku haysta.

Wada noolaashaha ku xusan qod.17 waxaa loo tixgalinayaa sida qoys.

**Qod. 4**

Warqadda unugga qoysnimada waa in lagu buuxiyaa marka madax qoyska uu xaasas badan leeyahay oo deeggan meelo ka duwan midda lagu sheegay warqadda qoyska. Warqadda unugga qoysnimada waa in lagu asteeyaa sayga, kaaso markasta ah madaxa qoyska; waana in lagu buuxiyaa xaas kasta oo ku nool meel ka gaara kuwa kale waana in ay wehliyaan, tilmaamaha ka sokow qaraabadeeda, caruurta iyo dadka kale ee iyada la nool. Waraaqaha unugga qoysnimadaa waxay ka koobanyihiin dokumentiyada ku lifaaqan warqadda qoyska (Mod. A), waana in iyaga lagu calaameeyaa lamabar isku xiga warqadda qoyska la tixraacayo iyadoo la xafidayo.

**Qod. 5**

Kaarka shaqsiga waa in lagu buuxiyaa dadka idil ee si joogta ah ula deggan deegaanka dawladda hoose, iyagoo ka madax bannaan xaaladdooda qoyska.

**Qod. 6**

Waraaqaha qoyska iyo waraaqaha unugga qoysnimada iyo kaararka shaqsiyaadka ee nooc kasta waa la isku geeynayaa oo lagu xafidayaa kaarar kala gooniya, oo hal isku nooc ah Dalka oo dhan.

**Qod. 7**

Waraaqaha qoyska waa in la siiyo lambarro isku xiga oo lagu habeeyo kaanka ay ku lamabareysanyihiin, kaaso ah hal qura deegaankaas dawladda hoose oo idil. Kaararka shaqsiyaadka waxaa si nidaamsan lagu habeenayaa tirada alifeedka (alfabetico) ee magacyadooda.

Darajooyinka sida Xaaji, Sheekh, Shariif iyo magcyada kuwa ka horreeya, waa qayb ka mida isla magacaas, wuxuuna qaadanayaa markaas nidaamka alifeedka darajada.

Haddii laba qof ay isku magac wataan waxaa la raacayaa xitaa niddaamka alifeedka magaca aabbaha iyadoo la raacinaya awowga xagga aabbe. Naynaasta waxay noqon kartaa wax kale oo wax lagula sooco: qofka leh waa in uu caddeeyaa.

Tilmaanta qabiilka waa mid iqtiyaari ah.

**Qod. 8**

Kaarka ulajeeddadiisa waa in lagu muujiyo isbaddalada ku dhacaya deegaanada aagagga dawladaha hoose ee ku saabsan dhalashooyinka, guurka, furriimada, dhimashooyinka, dhismooyinka, kulamada, wixii la baabi'iyo ama baabi'inta qoyska, guuritaanka deegaan dawlaeed hoose kale ama meelaha miyiga ama dibadda.

**Qod. 9**

Kala duwanaanshaha ka yimid dhalashada, guurka, furriinka iyo dhimashada, macluumaadka waxaa ka hadli doona diiwaannada u dhigma ee lagu sheegay qod. 20aad ee soo socda.

**Qod. 10**

Qoys madaxeed kasta waa in wargaliyaa Madaxa Dawladda Hoose 10 cisho gudahood macluumaad kasta ee looga baahanyahay warqadda qoyska iyo warqadda unugga qoysnimada oo ku saabsan ha ahaadaan kuwa ka mid noqonaya degsiimada iyo kuwa laga saarayo ama kuwa ka baxaya.

**Qod. 11**

Cid kasta oo ka wareegta deegaan dawlad hoose una guurta baadiyaha ama dibadda u qaxda halkaasna deeegaan ka dhigata waa in ay soo wargelisaa Madaxa Dawladda Hoose ee uu ku qornaa iyo marka ugu horreysa, xitaa Madaxa Dawladda Hoose ee uu doonayo in u wareego. Waajibaadkaasu wuxuu saaranyahay Madaxa Qoyska marka qoyska dhan ay guurayaan ama canug ama qof awood la' ama ah da' yar..

**Qod. 12**

Dadka ka imaanaya deegaamo kale ee Dawlada Hoose waa in lagu qoraa shaxan ku habboon, oo la mida nooca lifaaqa (Mod. O), deeganka Dawladda Hoose ee uu ka yimid, kaaso isla markiiba ka tirtiraya kaarkiisa, isagoo wargelinaya isla markaas maclumaadka guud qofka daneynaya deegaanka dawladda hoose ee uu u soo guuray.

Haddii la doonayo in lagu qoro kaar-uruuriyaha dad isqaba oo dibadda ka soo haajiray soona galay Soomaaliya, ee doonaya in ay dagaan deegaan Dawlad Hoose ee ka duwan kii uu horay u degganaa, Dawladda Hoose qaabilisaa waa in ay wargelisaa Dawladdii Hoose ee hore, taaso hubinaysa macluumaadka guud ee qofka daneynaya iyadoo bixinaysa macluumadka idil iyo dokumentiyada lagama maarmaanka u ah diiwaangelinta.

**Qod. 13**

Marka qof dhasho ama uu u guuro deegaan Dawlad Hoose kale ama meel miyi ah amase uu dibadda u qaxo si uu halkaas u dego, kaaraka shaqsiga waxaa lagu keydinayaa kaar-uruuriye, sida uu sheegayo qod, 7 ee la soo sheegay.

Haddii dhammaan xubnaha uu qoysku ka koobanyahay ama unugga qoyseedka ay wada geeriyoodan ama ay u guuraan deegaan Dawlad Hoose kale ama miyiga amase ay dibadda si kama dambaysa u qaxeen amse ay ka qayb noqdeen qoys kale ama ay samaysteen mid cusub, waraaaqahooda qoyska ama unuggooda qoysnimo waxa loo warejinayaa kaar-uruuriye kale oo gaara kadib markii lagu muujiyo sababata looga saaray.

**Qod. 14**

Dhaq-dhaqaaqa qaxootiga dadka reer miyiga waa in lagu diiwaangeliyaa:

a) Ku dhex jira Diiwaanka soogalootiga (Form E), ee dadka dega degaanka degmada.
b) Diiwaanka qaxa (Mod. F) dadka dega deegaan Dawlad-hoosaad Dalka ama dibadda ama u guura miyiga.

**Qod. 15**

Caruurta si ku-meelgaara u maqnaada sababa waxbarasho awgood ama sababa ciidan waxay ku sii jirayan warqadda qoyska ama unugga qoyseedka ay ka mid ahaayeen.

Kaararkooda shaqsiga, laakin waa laga saarayaa kaar-uruuriyaha waxaana lagu haynaya kaar-uruuriyaha kale ee dadka sida ku-meelgaarka u maqan.

**Qod. 16**

Dadka sida ku-meelgaarka ah ku jira machadayada samafalka ama daryeelka, maxaabiista xukun sugayaasha iyo kuwa ku xakuman xarig aan ka badnayn 20 sano waxay ku sii jirayaan kaar-uriuuriyha dadka deegaanka Dawladda Hose ay ka yimaadeen. Kaararka daneyeyaasha laakiin waxaaa lagu haynayaa kaar-uruuriyaha " dadka sida ku meelga u maqan".

Haddii dadka la soo sheegay ay ka yimadeen meelo ama xarumo aan ka tirsanayn deegaan Dawlad Hoose waxa lagu qorayaa kaar-uruuriyaha dadka deegaanka Dawladda Hoose oo machadyada la soo sheegaay ay xarumaha ku leeyihiin.

Kaararka dadkaas waxaa lagu haynayaa Kaar-uruuriye loogu taagalay “dadka sida ku-meelgaarka u maqan”

**Qod. 17**

Dadka ku jira waqti aan la cayimin machadyada samafalka ama daryeelka iyo xukumanayaasha xabsi daaiimka ama xarig ka badan 20 sano, waa laga saarayaa kaar-uruuriyaha dadka deegaanka Dawladda Hoose ee ay ka yimaadeen, waxaana lagu qorayaa kaar-uruuriyaha maccadyada iyo meelaha ciqaabta ee kor lagu soo sheegay.

**Qod. 18**

Askarta ay qoysaskoodu la socoto oo la baddalo iyagoo uu wehliyo madaxa qoyska, waxaa lagu qorayaa kaar-uruuriyaha dadka deegaanka Dawladda Hoose xarunta Qaybtu uu shaqada ka hayo.

Askarta la baddalo ee xaas la’aanta ah, waxay ku sii jirayaan kaar-uruuriyaha Dawladda Hoose ee uu ka yimid; kaarkoodana waxaa lagu darayaa kaar-uruuriyaha “ dadka sida ku meelgaarka ku maqan”.

**Qod. 19**

Taliska askarta joogta meelo ka mida Dalka ee deegaanada dawladaha Hoose waa in uu saddex biloodle kasta soo sheegaa tirada joogta ah Qaybta ama unugga.

**Qod. 20**

Diiwaannada dhalashada (Form G), guurka (Form H), furiinka (Foomka I) iyo dhimashada (Foomka L), waxaa lagu hayaa 2 nuqul oo asal ah, bog kastana waxaa ansixiyay bilawga sanadka, Guddoomiyaha Gobolka ka mas'uulka ah degaanka, kaas oo sidoo kale diiwaangeliya tirada boggaga ee diiwangelin kasta lagu sameeyay.

Mid ka mida labada diiwaan ee asalka ah ee la soo sheegay waxaa lagu keydinayaa sanadka kasta dhammaadkiisa Guddoomiyaha Gobolka. Guddoomiyaha Gobolka Gobolku wuxuu siinayaa Dawladaha Hoose hadba marka ay weydiistaan. Diiwaanada waxaa la siinayaa lambarro isku xiga oo la siiyo Dawlad Hoose kasta iyadoo Guddoomiyaha Gonolka uu haysanayo liistsada tusaalayaasha la qaybiyay.

**Qod. 21**

Qoraalka kooban ee lagu qoraya diiwaanada waxaa loo samaynayaa qaab israacsan taariikh ahaan oo leh lambarro isku xiga oo sanad kasta la cusboonaysiiyo. Diiwaanada dheeraadka waxaa lagu sii wadayaa taxana lamabarrada isku xiga ee diwaanada waaweyn/muhimka.

**Qod. 22**

Macluumaadka ku saabsan guurka ay sameeyaan Qaaliyaasha, ama wakiiladooda ama qof Maamulka siiyay oggolaasho iyo sidoo kale kuwa furriinka oo ay kuwaasi ku dhawaaqeen, waxaa laga sameynayaa shahaadooyin la xariira oo waafaqsan shaxanka M iyo N ee ku lifaaqan Dekereetadaan, nuqul waxaa lo dirayaa qaaliyaalka ee deegaanka Dawladda Hoose ee iqtisaaska ku leh, muddada ku xusan qod. 7 Amarka lr. 5 ee 24 Feb.1953.

**Qod. 23**

Macluumaadka ku saabsan dhalashooyinka iyo dhimashooyinka waxaa loo uruurinayaa qaabka lagu sheegay qod. 5 iyo 6 amarka la soo sheegay amase, mararka la dayaco ashtakada, xitaa si toosa Dawladaha Hoose kuwaaso xaafiis ahaan samaynaya baarista loo baahanyahay.

**Qod. 24**

Madaxda Dawladaha Hoose waxay iqtiyaar u leeyihiin in ay u diraan cid kasta si ay macluumaad iyo faah-faahimo uga keenaan sida loo habeeyay iyo habsami u haynta kaarar-uruuriyasha dadka iyo sida diiwaanada looga baaraaandegay Dekereetadaan.

**Qod. 25**

Kuwa ku xadgudba nuxurka Dekeretadaan waxaa lagu dabbaqayaa ganaax ah sh. So 20 illaa 100 ee ku cad Amarka lamba. 5 ee 24 Feberaayo, 1953.

Muqdisho, 25 Feberaayo 1953.

Maamulaha

**E. Martino**